97

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR**
**MUQDISHO – SOMALIYA**

جمهورية الصومال الفيدرالية
محكمة ناحية ودجر
مقديشو – الصومال

**FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA**
**WADAJIR DISTRICT COURT**
MOGADISHU-SOMALIA

**SUMMAD:MDWAD/133/2022** **TR. 29/01/2022**

**UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, KALA QAYB SASHO HANTI IYO WAKAALADO.**

Maanta oo ay taariikhdu tahay **29/01/2022**, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) **Maxamed Axmed Xasan (Galaal),** Somali ah, Ku Dhashay Guriceel, Sanadkii 1980, Ina Luul Xirsi Dhoore, Lehna Somali Passport No. P00623182.

2-) **Cabdiwali Cabdulle Maxamed,** Somali ah, Ku Dhashay Cadaado, Sanadkii 1979, Ina Canbaro Yuusuf Xasan, Lena Somali National ID No. 27904058050604.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in ay Geeriyootay Marxuumad **CAASHA SHIDDO CABDI**, kuna Geeriyootay Muqdisho, Sanadkii 1988, Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuumada Aabaheed **iyo** Hooyadeed ay ka geeri horeeyeen, Nina Ma uusan Qabin, ayna ifka uga tagtay oo dhaxlaya 1- Wiil , iyo 1- Gabar, Waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

**DADKA:-**

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| **1**-Maryan | Faarax | Warsame | Degan UK | Dhalatay 1935 | (Gabadhii Marxuumada) |
| **2**-Saciid | Faarax | Warsame | Degan Kenya | Dhashay 1956 | (Wiilkii Marxuumada) |

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumada dhaxleysa oo Nool ama Geeriyootay, haday noqon lahaayeen Asal Ama Farac.

**HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA.**

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUMAD CAASHA SHIDDO CABDI,** ay ifka uga tagtay **1**- Guri dhisan oo ku yaal Xamar Degmada (**WARDHIIGLEEY**), Cabirkiisuna yahay ***899-MQ***, Soohdintiisuna tahay Waqooyi waxaa ka mara **Jid**, Koofur waxaa ka xiga Guri Lr. 1182/58, Galbeed waxaa ka xiga Maryan Muuse Mataan, Bari waxaa ka xiga Guri Lr. 269/60, Lehna W.M.L.8865/77, Tr. 16/03/1977, Kana Soo Baxday Xafiiska Nootaayo Muqdisho uuna Saxiixay Dr, Muuse Xuseen Sadiiq, **2**- Guri dhisan oo ku yaal Xamar Degmada (**HODAN**), Cabirkiisuna yahay ***450-MQ***, Soohdintiisuna tahay Waqooyi waxaa ka xiga Guri Lr. 15/C, Bari waxaa ka xiga Guri Lr. 17/C, Galbeed waxaa ka mara **Jid**, Koofur waxaa ka xiga Guri Lr. 16/C, Lehna W.M.L 11664/79 Tr. 08/12/1979, kana soo Baxday Nootaayo Muqdisho, uuna saxiixay Dr. Muuse Xuseen Sadiiq.

**WAKAALADO**

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Kala ah **1**- Saciid Faarax Warsame, uu soo wakiishay ***Arro Hersi Magan***, sida ku cad Warqad wakaalad Guud, Rep No. 22512/21, Tr. 31/10/2021, Kana Soo Baxday Xafiiska Nootaayo Dayax Laanta Nairobi uuna Saxiixay Dr, Aadan Jimcaale Maxamed, **2**- Maryan Faarax Warsame, ay soo wakiilatay ***Xirsi Daahir Diiriye,*** Sida Ku Cad :-



Address: Wadajir Distric, General Da'ud Section, Mogadishu, Somalia Opposite the Wadajir Police Station Tell: +252619334488/Email: Maxdeg.wadajir@gmail.com

Warqad Wakaalad Guud No. DIW/AA/211208/21, Tr. 10/12/2021, kana soo baxay CNA Solicitors - London, uuna saxiixay mada xafiiska Avv/ C/raxmaan Axmed-Nuur Cali, Lehna Warqad damaanad Wakaalad Guud, Rep.80488/MPN/2021, Tr. 27/12/2021, kana soo baxday Nootaayo Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble, waxayna u soo Wakiisheen in ay u maamuli Karaan, dhaxalkoob u samayn Karaan, u Qeybin karaan, xafidi Karaan, Gadi Karaan, Hibeyn Karaan, Wareejin Karaan, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karaan, dhisi Karaan, kireyn Karaan, ka saari Karaan, saxiixi Karaan kaalintooda, una doodi Karaan una dacwoon Karaan oo qareen u qaban Karaan, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karaan qof waliba qismiga uu ku leeyahay hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen Hooyadood **MARXUUMAD CAASHA SHIDDO CABDI.**

**QIIMEYN & QAYBSI HANTI.**

Waxay Dhaxaltooyada Ku Heshiiyeen in Hanti ay u Qabysadaan Sida uu Qabo Sharciga islaamka intaas Ka Dib Waxaa La Qiimeeyey Labadii Guri oo ay Marxuumada Ka Geeriyootay Waxaana Lagu Kala Qiimeeyey Sidatan Soo Socota:-

1- Guri dhisan oo ku yaal Xamar Degmada (**WARDHIIGLEEY**), Cabirkiisuna yahay **899-MQ**, Soohdintiisuna tahay Waqooyi waxaa ka mara **Jid**, Koofur waxaa ka xiga Guri Lr. 1182/58, Galbeed waxaa ka xiga Maryan Muuse Mataan, Bari waxaa ka xiga Guri Lr. 269/60, Lehna W.M.L.8865/77, Tr. 16/03/1977, Kana Soo Baxday Xafiiska Nootaayo Muqdisho uuna Saxiixay Dr, Muuse Xuseen Sadiiq, Waxaa Gurigaan Lagu Qiimeeyey US$.200.000 "Labo Boqol oo Kun oo dollar" Waxayna Dhaxaltooyada Ku Heshiiyeen in Gurigaan ay Qaadato oo Milkiyadiisa Ku Wareegto **Maryan Faarax Warsame,** isla Markaana ay u Celisay Saciid Faarax Warsame Lacag Dhan Us$.40.000 "Afarta Kun oo dollar" oo ah Qismiga Ka dheeriga ah Dhaxalkeeda Wixii Maanta Ka Danbeeya Gurigaan Wuxuu u Wareegay **Maryan Faarax Warsame**.

2- Guri dhisan oo ku yaal Xamar Degmada (**HODAN**), Cabirkiisuna yahay **450-MQ**, Soohdintiisuna tahay Waqooyi waxaa ka xiga Guri Lr. 15/C, Bari waxaa ka xiga Guri Lr. 17/C, Galbeed waxaa ka mara **Jid**, Koofur waxaa ka xiga Guri Lr. 16/C, Lehna W.M.L 11664/79 Tr. 08/12/1979, kana soo Baxday Nootaayo Muqdisho, uuna saxiixay Dr. Muuse Xuseen Sadiiq, Waxaa Gurigaan Lagu Qiimeeyey Lacag US$.280.000 "Labo Boqol iyo Sideetan Kun oo dollar" Waxayna Dhaxaltooyada Ku Heshiiyeen in Gurigaan uu Qaato oo Milkiyadiisa Ku Wareego **Saciid Faarax Warsame,** Waxaa Kaloo Loo Celiyey Saciid Faarax Warsame, Lacag Dhan Us$.40.000 "Afarta Kun oo dollar" oo ah Qismiga Ka dhiman Dhaxalkiisa.

**DAMIINU MAAL**

- **Maxamed Axmed Xasan (Galaal) & Cabdiwali Cabdulle Maxamed,** Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaaladaha Sare Ku Xusan Soo diray.

MAXKAMADDA DEG. WADAJIR

**=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=**

1- MAXAMED AXMED XASAN (GALAAL)

2- CABDIWALI CABDULLE MAXAMED

**=SAXIIXA WAKIILKA 1-AAD=**
AARO HERSI MAGAN

**=SAXIIXA WAKIILKA 2-AAD=**
XIRSI DAAHIR DIIRIYE

**SUGITAANKA MAXKAMADDA.**

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiyada Guryaha oo ay marxuumadda ku qoran tahay, Markay aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida Marxuumada **CAASHA SHIDDO CABDI**, oo ay dhaxalkeeda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in Dhamaan Dhaxaltooyada ay soo kala Wakiisheen **Arro Hersi Magan,** iyo **Xirsi Daahir Diiriye**, ayna Wakiil buuxa u yihiin Dhamaan dhaxaltooyda, isla markaana ay awoodaas buuxda u leeyihiin ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen Marxuumada sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob,Kala Qayb sasho Hanti iyo Wakaalado ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

**KAALIYAHA MAXKAMADDA**
C/risaaq Cali Cabdi (Caabi)

**GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR**
Dr. Axmed Maxamed Cali

MAXKAMADDA DEG. WADAJIR
محكمة ناحية ودجر



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA جمهورية الصومال SOMALI REPUBLIC

BAASABOOR جواز سفر PASSPORT

Nooca/ النوع /Type: P
Astaanta Dalka/ رمز البلد /Country Code: SOM
P00623182

Magaca/ الاسم /Name
MOHAMED AHMED HASSAN

Magaca Hooyada/ اسم الام /Mother's Name
LUL HERSI DHORE

NID: 28002026229182

Jinsiyada/ الجنسية /Nationality
SOMALI

Shaqada/ المهنة /Occupation
MERCHANT

Taariikhda Dhalashada/ تاريخ الميلاد /Date of Birth
02 Feb 1980

Meesha laga Bixiyey/ مكان الاصدار /Place of Issue
MOGADISHU

Lab Dheddig/ الجنس /Gender
MALE

Meesha Dhaleshada/ مكان الميلاد /Place of Birth
GURI'EL

Taariikhda la Bixiyey/ تاريخ الاصدار /Date of Issue
18 May 2017

Xafiiska laga Bixiyey/ جهة الاصدار /Issuing Authority
SOMALI GOVERNMENT

Taariikhda uu Dhacayo/ تاريخ الانتهاء /Date of Expiry
17 May 2022

Saxiixa Qofka/ توقيع حامل الجواز /Holder's Signature

P<SOMHASSAN<<MOHAMED<AHMED<<<<<<<<<<<<<<<<<<<

P006231829SOM8002022M2205175280020262291822O

MAXKAMADDA DEG. WADAJIR
محكمة ناحية ودجر



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال
SOMALI REPUBLIC
WARAQADDA AQOONSIGA
بطاقة الهوية
IDENTITY CARD

L. Qaranka/ رقم الهوية /National ID
27904058050604

Magaca/الاسم/Name
ABDIWALI
ABDULLE MOHAMED

Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth
05 Apr 1979 ADADO

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue
04 Jul 2018 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الإنتهاء/Expiry
03 Jul 2023

Lab/Dheddig/الجنس/Gender
MALE